QIYAMKA 12

25/09/2020

Salaamo Qoyska Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb,

Inta lagu jiray xiligaan waxbarashada onleenka iyo qorsheynta ugu dambeyn dib u furida dugsiyada, waxaan inta badan maqalnaa “Waan ku wadajirnaa midaan,” iyo waxaan sii wadayaa inay midaan u arkaan inay run ka tahay halkaan DCSD. La shaqeynta jaalalka bulshadeena waxay muhiim u tahay gaarista shaqada wanaagsan ee aan sameyno maalin kasta iyo maalin walba. Kooxda hogaankeena DCSD waxay sii wadeen inay ka qeybqaataan oo jawaab celin ka helaan daneeyayaasha oo ay la jirto hadafka hormarinta isgaarsiinada bulshadeena oo dhan ah.

Tusaale weyn oo jaalalka daneeyayaasha bulshadeena ee shaqeynayo waa Gollaha La talinta Maamulayaasha (PAC). PAC waxay ka sameysantahay waaladiin, shaqaalaha dugsiga, arday, iyo xubnaha bulshada. Dadaalkooda waxay nagu tageertay iskaashi iyo afkaaro lagu kordhinayo guusha ardayda iyo waxqabadka oo ay ku jiraan:

1. Joogteynta aragtida guud ee dugsiga oo dhan oo arimaha.
2. Matalayo sida xiriirka u dhaxeeyo dugsiga iyo bulshada.
3. Ku dhiirogelinayo ka qeybgalka waaladiinta iyo daneeyayaasha kale oo gudaha bulshada dugsiga.
4. Ka shaqeynayo kordhinta guusha ardayda iyo waxqabadka oo dhinaca howlgalada daahfuran iyo dhab dhaqamada ugu wanaagsan ee la wadaagay.

Hambalyooyin xubnaheena dhawaan la doortay ee PAC! Fadlan fiiri websaydka PAC oo aqbaaraha iyo warbixinta doorashada labaad.

Isbuuca xiggo, waxaan sameyneynaa kooxda diirada ee Gollaheena La talinta Maamulayaasha. Macalimiinteena, ardayda, iyo kooxyada la talinta qoyska waxay sidoo kale martigelinayaan wadahadalo mustaqbalka dhow. Waxaan sidoo kale jeclaan lahaa inaan siiyo ogolaansho dhaqsi ah hogaamadeena bulshada ganacsiga deegaanka oo ka kooban Gollaheena La talinta Kormeeraha guud (SCAC). Golayaashaan iyo jaalalkooda waxay bixiyaan tallo qiimo leh oo muhiim u ah gaarista yoolalkeena degmada. Runtii aad ayaan ugu faraxsannahay in shaqsiyaad badan ee ka qeybqaatay iyo rabitaanadooda ugu adeegaan bulshadeena.

Dib u furida Dugsiyada Waji ku Wajiga

Guddi Howleedka Dib u furida DCSD COVID-19 waxay sii wadayaan inay martigeliyaan diirad saarida kooxyada si markaas si wanaagsan ugu fahmaan baahiyada iyo walaacyada qoysaskeena DCSD sidoo kale sida macalimiinteena iyo shaqaalaha. Jawaabaha la isaga keenay kooxyadaan diirada waxay nagu caawineysaa sifeynta qorshaheena dib u gelida. Waad mahadsantihiin kuwa badan oo idinka ah oo waqtiga ku qaatay si kaxsan jadwalkaaga mashquulka ah inaad ka qeybqaadatid wadahadaladaan. Jadwalka hoose wuxuu tilmaamayaa dib u furida dugsiyada DCSD. Markale waxaa kaliya oo aan ku celineynaa aqoonyahanada

waxbarashada waji ka wajiga markii halista faafida COVID-19 noqoto dhexaad ama ugu yaraan – wax ka yar 100 dacwadood 100,000 ee qofba oo muddo 14-maalin ah.

Xogta Isbadelka Hadeer ee COVID-19

Sida xasuusin, Guddi Howleedka Dib u furida DCSD COVID-19 ayaa baaro websaydka GDPH maalin walbo 3:00 p.m. kadib si loo kormeero isbadelka xogta hadeer ee loogu tallogalay Gobolka DeKalb iyo Georgia. Fadlan booqo https://dph.georgia.gov/covid-19-daily-status-report kadib 3:00 p.m. Maalin walba si aad u eegtid warbixinta ugu dambeyso.

Aqbaaro fiican

Waan ku faanaa macalimiinteena iyo dugsiyada badan, sida machadka Waxbarashada Hore ee DeKalb (DECA), taas oo dhawaan lagu magacaabay Dugsiga Qarabka Blue Ribbon. Tani si ayay sharaf u tahay. Aqoonsiga wuxuu ku saleysanyahay waxbqabadka waxbarashada guud ee dugsiga ama hormarka buuxinta meelaha banaan ee guusha ee ka midka ah kooxyada hoose ee ardayda. Waxaan bogaadinayaa Dhaqtar Michelle Jones, Maamule Edward Conner, shaqaalaha DECA, iyo mida ugu muhiimsan, ardaydeena oo kasbashada guushaan heerka sare ah. Hubi inaad fiirisid sheekooyinkeena websaydka oo aqbaaro aad u wanaagsan!

Waxaan ka qeybgalay Shirka Qeybta Lakeside oo si dhab ah uga mahadceliyay iskaashigooda. Mahadcelin gaar ah ee ku aadan xubinta Guddiga Gabar Allyson Gevertz (Degmada 4), Kormeeraha guud ee Goboleedka II Mudane Trenton Arnold, iyo maamulayaasha wadaagay sida ay u taageerayaan macalimiinteena iyo aqoonyahanada inta lagu jiro waqtigaan. Waxaan sidoo kale jeclaan lahaa inaan u mahadceliyo Guddigeena La talinta Ardaydan oo aan kula kulmay onleenka oo waxaan rajeynayaa inaan arko shaqada aan caadiga aheyn ee aqoonyahanadeena!

Waxaan rabaa inaan xasuusiyo qof walba ee bulshadeena inaan xasuusino dagayaasha inta lagu jiro waqtiyadaan murugada badan, gaar ahaan inaga oo laga yaabo inaan kormeerno kacdoonka shacabka iyo cadaalo darada bulshada waxay ka dhacdaa agagaarkeena. Fadlan ogow in la taliyayaasha DCSD, shaqaalaha, iyo macalimiinta ay marwalba diyaar u yihiin inay ku caawiyaan hagida ardayda iyo qoysaskooda inta lagu jiro dhibaatada weli wadahadalada muhimka ah ee jinsiyada, kala duwanaanshaha, iyo ku darista.

Sida dabayaaqadii John Lewis wadaagay, “Ma jiraan wax joojin karo awooda dadka ka go’antahay oo la go’aansaday si loo sameeyo kala duwanaanshaha bulshadeena.” Waxaan si qalbi furan u aaminsannahay in wadajirka aan siin karno qalabyada iyo illaha

aqoonyahanadeena da’yarta ay isbadel ugu sameeyaan caalamka iyo mustaqbalka. Waad ku mahadsantahay ka dhigida degmadaan mid xoogan, bixineysid talladaada, oo aad taageereysid ardaydeena iyaga si onleen ahaan ku gaarayaan guusha.

Hogaankaaga kooxda ee #1,

Cheryl Watson-Harris